



Relmaging Education During the Pandemic

**PORTLAND  
PUBLIC SCHOOLS**



## Waxaanu Qorshaynaynaa Waxbarashada Isku dhafka ah ee Qaybta 4aad (4th Quarter)

Febraayo 26, 2021

Mudane/Marwo Qoysaska iyo Shaqaalaha PPS,

Toddobaadkan, Kormeeraha guud Guerrero iyo hoggaamiyeyaasha sare ayaa [waxay u soo bandhigeen Guddiga Waxbarashada warbixinta cusub](#) ee dib u furitaanka iskuulka COVID-19. Warbixinta cusub waxaa inteeda badan diirada lagu saarayey qorshaha degmada ee ah inay bixiso waxbaris isku dhafan oo la siinayo fasalada dugsiga dhexe iyo sare ugu dambayn bartamaha Abriil. Tani waxay daba socotaa ku dhawaaqis la mid ah oo laba toddobaad ka hor lagu dhawaaqay oo ku saabsanayd fasallada barbaarinta carruurta (kindergarten) ilaa 5aad.

### WAXBARISTA ISKU DHAFAN OO BILAABANAYSA ABRIL

Marka la soo koobo: PPS waxay qorshaynaysaa inay u furto fasallo waxbaris isku dhafan bisha Abriil oo loogu talagalay qoysaska doorbidaya inay ardaydoodu waayo-aragnimo u helaan qof ahaan wax ku barashada sannad dugsiyeedkan. Qorshaheenu wuxuu jawaab u yahay isbeddellada soo wanaagsanaanaya ee COVID-19 ee Oregon iyo aagga magaalada Portland. Waxay la jaanqaadaysaa hagitaanka ka imanaya Maamulka Caafimaadka ee Oregon iyo Waaxda Waxbarashada ee Oregon, oo ay qiimeeyeen khubarada caafimaadka dadweynaha oo ay ku jiraan Kooxda Latalinta Caafimaadku. Qorshuhu wuxuu sidoo kale ka tarjumayaa talo soo jeedinta qoysaskeena, kuwaas oo ra'yi ururinteenii ugu dambayey ee qoysaska fasallada barbaarinta carruurta (kindergarten) illaa fasalka 5aad, ay muujinayaan in 69% ay rabaan nooc ka mid ah waxbaris shaqsi ahaan loo imaanayo in loo diyaariyo ardayda.

Fadlan xasuusnow in aanaan dhamaan ardaydeena iyo shaqaalaheena isku mar dib ugu soo wada celin karin fasallada iyadoo la raacayo xeerarka badbaadada safmarka ee Waaxda Waxbarashada Oregon. Waxaan heli doonaa macluumaad aad u badan, oo ay ku jiraan tusaalaha jadwalka iskuulka, ee loo heli karo qoysaska marka aan gabagabeyno wadhadallada aanu la yeelanayno ururka macallimiinta.

*Xulashada waxbarasho ee isku dhafka ah (isku dhafan) ee loogu talagalay qoysaska ayaa sugaysa heshiis lala galo Ururka Macallimiinta ee Portland oo ku xiran tirada kiisaska COVID-19 ee gobolkeenu in ay ka hoosayso heerarka iyo shuruudaha caafimaadka bulshada ee hadda jira. Isbeddellada ku yimaada mid ka mid ah kuwan toddobaadyada soo socda ayaa waxay dib u dhigi karta xilliga bilowga ee aanu soo jeedinay in ay bilaabato waxbarashada isku dhafan.*

### AMMAANKA ARDAYDA IYO SHAQAALAHA

Qoysaska u tixgelinaya waxbarashada isku dhafan ardaydooda, ayaa waxaa muhiim ah in ogaadaan in PPS ay sii wadidoonto la shaqaynta khubarada caafimaadka bulshada iyo hay'adaha iyo [Gudigeena PPS](#)

[ee Latalinta Caafimaadka](#). Waxaanu sidoo kale sii wadaynaa inaan raacno tilmaamaha/hagaha [Iskuullo Diyaar ah, Barasho Ammaan](#) ah ee ka socda Waaxda Waxbarashada ee Oregon.

Waxaad ka heli kartaa faahfaahin ku saabsan qorshaynteenaa isku dhafka caafimaadka iyo badbaadada adiga [oo halkan gujinaya](#).

Waxaanu idinla soo xiriiri doonaa anaga oo wadna macluumaad dheeraad ah usbuuca soo socda. Wakhti xaadirkan, waxaan idiin rajaynaynaa isbuuc dhamaad ammaan iyo nabadgelyo leh.